

# Waraaqda Wararka Xajmiga Shaqada Janitorial



Daraasadda shaqada waardiyanimada - Wargelin

Muqa 1, Nuqulka 2

Kusoo dhawow Guga 2022! Waxaan rajaynaynaa inaad nabad iyo caafimaad ku sugnaato. Waxaan jeclaan lahayn inaan wadaagno xoogaa w ah ooargelin ah ku saabsan mashruuca. Waa kuwan waxa aanu ka shaqaynaynay:

## SAHANKA SHAQADA WAARDIYANIMADA - DHAMAYSTIRAN

- Sahan lagu sameeyay waardiyaasha guud ee WA ayaa la sameeyay laga bilaabo Noofambar 2019 illaa Febraayo 2020
- Waxaan daabacnay warqad qeexaysa hababka sahanka iyo natiijooyinka qaar ([si bilaash ah uga akhriso warqada halkan](#), ama [akhriso soo koobida](#)). Waxaan wali falanqaynaynaa xogta waxaanan soo saari doonaa natiijooyin badan dhawaan:
  - 21% ka mid ah waardiyaasha ayaa la soo sheegay in uu ka helay xirfadle daryeel caafimaad dhaawac shaqo ama jirro la xiriira (haweenka ayaa ka khatar badan ragga; Waardiyaasha Latinka ah ayaa leh khatar ka sareysa kuwa cadaanka ah)
  - Kaliya kala bar (52%) ka mid ah waardiyaasha lasoo sheegay in lagu dhaawacay ama ku xanuunsaday shaqada ayaa sheegay in ay xareeyeen dacwad magdhow ah (workers' compensation, WC)
  - Shaqaaluhu waxay ka waramaan kala duwanaanshaha xaaladaha shaqada ee laga yaabo inay door ka ciyaaraan khatarta dhaawaca, sida inayan awoodin inay qaataan nasasho ama bixitaan, iyo walaac ku saabsan shaqaale ku filan iyo sahayda.

## QIIMAYNTA SHAQADA - WAA LA DHAMMAYSTIRAY

- Cilmi-baarayaashayadu waxay ku booqdeen waardiyaasha goobta si ay ugu kuurgalaan oo u qoraan sida ay u dhamaystiraan hawlhooda. Iyadoo faafitaanka COVID-19 uu joojiyay qiimeyntan kahor qorsheyntii hore, waxaan aaminsanahay qiimayntan inuu yahay mid la isku halayn karo. Waxaa laga yaabaa inaan sameyno booqashooyin badan mustaqbalka.

## QIIMAYNTA SHAQADA – AYAA SOCOTA

- Dhammaan xogta aan ururineyno waxaa loo isticmaalaa si loo horumariyo qiimaynta shaqada - agab si xor ah loo heli karo si uu u caawiyo loo shaqeeyaha iyo kooxaha shaqada si ay u go'aamiyaan culeyska shaqada ee badbaadada leh (si ay u caawiyaan qorsheynta qandaraasyada, u qoondaynta heerarka shaqaalaha, qiimeynta culeyska shaqada, iyo bixinta tilmaamo hagaajin). Nooca beta ee tijaabada waxa la heli doonaa Xagaaga 2022.

## WARAYSIYADA SHAQAALAHA LA DHAAWACAY - AYAA SOCDA

- Waxaan waraysiyo taleefoon kula yeelanaa waardiyayaasha ku dhaawacmay ama ku xanuunsaday shaqada kuwaas oo xereeya dacwada magdhowga shaqaalaha. Wareysiyadani waxay soo ururiyaan faahfaahinta ku saabsan khataraha iyo wixii dhacay, si aan u aqoonsan karno khataraha caadiga ah oo aan ka caawino ka hortagga dhaawacyada mustaqbalka. Ilaa hadda waxaan waraysanay 23 waardiye.

## SAHANKA SHAQOYINKA WAARDIYANIMO - AYAA LA DHAMAYSTIRAY

- Waxa aanu samaynay sahan onayl ah oo aanu ku samaynay shirkadaha waardiyayaasha si aanu arrimaha uga barano dhinaca ganacsiga, laakiin 25 shirkadood oo kaliya ayaa ka jawaabay sahankeena. Waxaan u diri doonaa sahan kale ganacsiyada Gu'ga/Xagaaga 2022.

## DUKUMENTIYADA WAXBARASHADA IYO TABABARKA - AYAA SOCDA

- Waxaan daabacnaa warside bilaash ah oo saddex biloodle ah iyo warqad talo bixin ah— [booqo websaytkayaga](#) si aad u hesho daabacaadaha
- Haddii aad hayso talooyin ku saabsan mawduucyo ama tababaro - fadlan nala soo socodsii!

## SU'AALO AMA FAALLOOYIN LOOGU TALAGALAY CILMI-BAARAYAASHA? WAXAAN RABNAA INAAD NALA SOO SOCODSIISID:

- [Isu diwaangali](#) Wargeyskeena saddex biloodlaha ah ee ku saabsan daraasadda, iimayl ahaan [JanitorStudy@Lni.wa.gov](mailto:JanitorStudy@Lni.wa.gov) ama wac 1-888-667-4277, riix 2 Daraasadda shaqada waardiyanimada